

HELIDA XUQUUQDA KU TAMASHLEYNTA DIBEDDA

Wadanka Iswiidhan waxaa ka jira qaanuun lagu magacaabo xuquuqda ku tamashleynta baadiyaha, taas waxeey ka dhigantahay in qof kasta uu xuquuq u leeyahay inuu si xor ah ugu tamashleyn karo keymaha iyo duurka, xataa waxuu qofka ku tamashleyn karaa dhulalka sida gaarka ah loo leeyahay, haduusan dhibaato ama dhaawac u geysaneynin.




Meesha aad rabtid ayaad ka joogi kartaa dhulka dabiiciga ah! Ma gali kartid beeraha ama dhulalka wax lagu beero!



Wax waad ku shiilan kartaa dhulka dabiiciga ah, weeyna ka sii ficantahay hwadaad la shiilatid qoyskaada! Waa inaad ogtahay meelaha aad wax ku shiilan kartid iyo meelaha kale.



Waxyaabo badan ayaad dhulka dabiiciga ah ka sameyn kartaa! Waxba kuma tuuri kartid dhulka, qashinka waa in hore loosii qaadaa markasta!



Xaajo musquleedkaada waa ku gudan kartaa keymaha. Warqad qaado, daboolna saxaradaada markaad xaajadaada dhameysatid.



Waxaad guran kartaa miro, xawaash iyo waarig! Ma goyn kartid geedaha xididooda mana jabin kartid laamaha.



Xoolo waad daaqsiin kartaa dhulal daaqeedka keymaha. Marnaba ma hilmaami kartid inaad albaabyada xirtid gadaashaa!



Waad guran kartaa badankood ubaxyada qurxoon ee aad aragto! Ma goyn kartid xididada geedaha ubaxyada. Ubaxyada qaar waa mamnuuc in la guro.



Waad booqan kartaa goobaha dhulal dabiicigooda la xafiday. Sidaad rabtid ma sameyn kartid markaad joogto dhulalka dabiicigooda la xafiday. Si taxadar leh u akhri waxa ku qoran tabeellayaasha meesha suran.



Meesha aad rabtid ayaad ka tagi kartaa dhulalka dabiiciga ah ee Iswiidhan, xuquuqda tamashleynta keymaha waxaa loogu tala galay inaan si wada jir ah u ilaalsano goobaha naga wada dhaxeeyo!



Iswiidhan waxaad du dabbaalan kartaa meel kasta oo lagu dabbaasho marka laga reebo meelo yar! Kuma dabbaalan kartid dhul uu qof kale leeyahay.



Baabuurka waad wadan kartaa markaad damaashaad u tageysid dhulalka dabiiciga ah. Kuma wadi kartid baabuurkaada meel aan aheyn jidadka loogu tala galay.

ILAALI NADAAFADDA
ISWIIDHAN